

QOFKEE NOQONKARA KELLI BIXIYE?

Warqad ku saabsan deeq bixinta kellida oo ka timid qof nolol ku bixinya

Waanu idin salaamaynaa!

Haddii adiga lagu soo diro warqadan waxay u badan tahay in aad adigu leedahay qof qaraabo oo ay kelliya xannuunayso qofkaas soo laga yaabo in qof kale kelli looga saaro (njurtransplantation). Waxaanu rabnaa in aanu warqaddan kugu wargelino sida la sameeyo marka loo arko inay arrintu hore u sii socoto iyadoo laga fikirayo marka kelli ku deeqida.

QOFKEE AYAA UGU DEEQIKARA?

Looma baahna in aad qofka qaraabo tihiin si aad kelida ugu deeqdo. Si kastaba ha ahaatee weli waxaa caadi ah in qofka qof kelli ugu deeqayaa uu kamid yahay dadka qoyskiisa ugu dhow xitaa haddii ay caadi noqotay in tusaale ahaan saaxiibada ama dadka ay qofkaa meel kawada shaqeeyaan ay deeq bixiyayaasha kelida ka mid noqdaan.

In lagu tixgeliyo inaad ka mid noqoto deeq bixiyayaasha waxaa khasab ah in aad tahay qof caafimaad qaba. Caqabadaha tooska ah ee qofka deeq bixiyaha hortaagan waa; macaanka, cudurka wadnaha, cudurka kansarka, cudurka kelyaha ama isticmaalka mukhaadaraadka. Sidoo kalena ma baarno dumarka uurka leh iyo dhammaan dadka dhalinyarada inay ka mid noqdaan deeq bixiyayaasha.

Inuu qofku go'aansado inuu noqdo deeq bixiye kelli waxay ku salaysan tahay inuu isagu doonayo inuu sidaa sameeyo, si uu qofkaasi u qaato go'aankaas waxa loo baahan yahay inuu qofkaasi kahelo warbixin sugan shaqaala daryeelka caafimaadka iyo taageero uu ka helo deggaanka ku hareeraysan (omgivningen). Inay dhaqaale kala qaataan qofka kelida ku deeqaya iyo qofka la siinayo arrintaas iyada ah lama oggola. Qofka la soo baaray inuu kelli bixinkaro lama oggola inuu cadaadis uga yimaado qofka kellidu xannuunasyo, qoyska/faamliga, saaxiibada ama daryeelka caafimaadka. Wax kastaba go'aanku ha noqdee waa in arrintaas la ixtiraamaa.

700

PEOPLE ARE CURRENTLY WAITING FOR A KIDNEY TRANSPLANT IN SWEDEN



MORE THAN

400

KIDNEY TRANSPLANTS ARE PERFORMED EVERY YEAR



NEARLY

4800

PEOPLE HAVE DONATED A KIDNEY IN SWEDEN



MORE THAN

16 000

KIDNEY TRANSPLANTS HAVE BEEN PERFORMED SINCE 1964



BAARITAAN

Si loo aqbalo inuu qofku yahay deeq bixiye kelliyeed waxa loo baahan yahay in la sameeyey baaritaan taxaddir leh oo ay ka mid tahay dhiigag la qaado, sawirka raajada, iyo qof kaala taliye dhinaca arrimaha bulshada (kuratorsamtal). Waxay qaadankartaa 6-8 bilood si loo ga gaaro dhammaan qaybaha loo baahan yahay in laga wadda sameeyo, laakiin marka dhammaan baaritaanada lawada sameeyo ayaa takhtarka baaritaanka kellida samaynayaa qiimayn kooban isagoo eegaya bal haddii ay suurtoagal tahay inuu qofkaasi kelli bixinkaro. Dokumentigaa ama waxyaabaha la ururiyey waxa loo dirayaa qaybta qaabilsan xubno ku tallaalida jirka (transplantationskirurgimottagningen) iyaga ayaa markaa qofka kelli bixiyaha ah ugu yeeraya qiimayntii ugu dambaysay.

Dad badan oo kelli bixiyeyaal ah ayaa u arka inay bixintu tahay mid wanaagsan oo ah dhacdo noloshana ku timid (livsombälvande) taas oo marwalba wax ka beddelaysa sida uu qofku u arko caafimaadkiisa iyo walaaltinimada xagga dadnimada ama bini'aadanimada.

SIDEE AYAAN ANIGU SAMEEYAA MARKA AAN SOO SHEEGAYO?

Haddii aad rabto inaad oggaato intaa in kabadan ama aad xiisaynayso in lagu baaro si aad kelli u bixiso waxaad la soo xiriiraysaa qaybta qaabilsan bixinta (njurmottagningen) kellyaha ee ku taala isbitaalka magaalada aad deggan tahay, halkan hoose ka fiiri meesha lala xiriirayo.

Waxaad si toos ah annaga noogala soo xiriirikartaa qaybta qaabilsan kellyaha ee soo socota:

Patientkoordinator
Tel 031-342 70 40